



Boosteejada Boeing Access Road

Guga 2025


Faahfaahin ku saabsan mashruuca

Mashruuca Boosteejada Boeing Access Road ee Sound Transit wuxuu ku dari doonaa boosteejo cusub 1 Dariiq shabakada Link light rail dhinaca galbeedka wadada East Marginal Way South, ee waqooyiga ka xigta wadada South 112th Street ee Tukwila. Boostejadu waxeey qayb ka ahayd Qorshaha Dhaqdhaqaqa Sound ee 1996 iyo qorshaha nidaamka cod-bixiyuu ansixiyay ee Sound Transit 3 (ST3) ee 2016 si kor loogu qaado isku xidhka iyo marin u helka gobolkeena.

Faa'lidooyinka iyo qeybaha mashruuca

Ku darista boosteejo cusub wadada Boeing Access Road waxay noqon doontaa:

- Mid xidha farqiga 5.5-mayl ee u dhexeeya Rainier Beach iyo boosteejooyinka Tukwila International Boulevard, iyada oo la ballaarinyo marin u helka gaadiidka halmar wada-qadaa dadka badan ee gobolka.
- Mid kordhisa marin u helka shabakada weyn ee Link light railsi ay dadka uga caawiso inay tagaan meelaha ay u baahan yihiin inay maalin walba tagaan.
- Mid bixisa isku xidhada Link light rail iyadoo ku soo dareysa goob baarkin cusub iyo xarun ay dadku iskugu kala wareegaan basaska.
- Mid qaabisha kobaca mustaqbalka iyo horumarinta gaadiidka ee loo qorsheeyay aagga mashruuca.



Adeeg degdeg ah oo joogto ah oo lagu tagayo goobaha:

Wadada Boeing Access Road ila Garoonka Diyaaradaha ee Sea-Tac: 10 daqiqiyo
Wadada Boeing Access Road ilaa magaalada hoose ee Seattle: 26 daqiqiyo



Xaalka mashruuca hadda: *Qorsheynta*


Sinaan iyo ka mid noqosho

Sound Transit birrattii, dhaabbata keenyaa fi hawaasa bMarka la joogo Sound Transit, waxaa naga go'an inaan abuurno xaaladaha lagama maarmaanka u ah si loo gaaro sinnaanta jinsiyadeed ee gudaha wakaaladeena iyo guud ahaan bulshada oo dhami. Wuxaan nafteena kula loolameynaa inaan

qorsheyno, dhisno, oo ka shaqeyno gaadiid dadweyne oo siinaya marin u helka siman guriyeenta, waxbarashada, xarumaha caafimaadka, iyo fursadaha shaqada, gaar ahaan kuwa ay waxyeelada ugu badan ka soo gaarto cunsuriyadda hay'adeed iyo mida nidaameed.

Wakhtiga mashruuca





Waggaa 2025 ganna keessaa haala haaraa

Markey ahayd bishii Maarsa 2025, Guddiga Maamulka ee Sound Transit waxay u aqoonsadeen goobta East Marginal Way meesha loo soo jeedinayo iney noqoto Boosteejada Infill ee wadada South Boeing Access Road si dib u eegis deegaan loogu sameeyo.

La-falgalka bulshada

Mashruucu hadda waxa uu ku jiraa marxalada injineernimada fikradeed iyo wejiga dib u eegista deegaanka ee qorshaynta. Wejigani, waxaan curinnaa naqshado fikradeed waxaanan qiimeynynaa saameynya macquulka ah ee deegaanka ee mashruuca. Falanqaynta deegaanka waxay u hoggaansami doontaa Xeerka Siyasadda Deegaanka ee Qaranka (National Environmental Policy Act, NEPA) iyo Xeerka Siyasadda Deegaanka ee Gobolka (State Environmental Policy Act, SEPA).

Marka lagu daro tixgalinta farsameed, jawaab-celinta bulshadu waxay ku wargelin doontaa naqshada boosteejada iyo walxaha la xidhiidha. Wuxaan la shaqaynaynaa magaalada Tukwila, ururada bulshada, iyo shakhsiyadka si aanu u martigelinno bixinta warbixino kooban, guryo furan, iyo wacyigelin iyo la-

La soco wixii soo kordha

Macluumaaad badan ka oggow mashruuca oo isku duwaan geli macluumaadka ugu danbeeya ee iimaylka lagu soo diro:

 soundtransit.org/graham-street-station

401 S. Jackson St., Seattle, WA 98104 | main@soundtransit.org
soundtransit.org | 888-889-6368/TTY: 711 | To request information
in alternative formats call 800-201-4900/TTY: 711 or
email accessibility@soundtransit.org.

falgelid dheeraad ah. Ka-qaybgalka bulshada iyo fikrad ku darsashadu waxay ka caawiyaan Sound Transit qorsheynta iyo qaabaynta nidaam ka tarjumaya baahiyaha iyo rabitaanka beeshada. Waxaa jiri doona dhawr fursadood oo aad kaga qayb qaadan karto inta uu socdo mashruuca, waadna la xidhiidhi kartaa haddii aad qabto wax su'aalo, fikrado, ama codsi ah si aad si kooban ugu warbixiso bulshadaada.

Mashaariicda la xidhiidha

Boosteejada Boeing Access Road waa mid ka mid ah mashaariic badan oo Sound Transit ay dhisayso si kor loogu qaado isku xidhka iyo marin u helka gobolkeenna. Ka sahmi mashruucyo badan soundtransit.org/system-expansion.

Su'aalo miyaad qabtaa?

La xidhiidh kooxdeena la-falgalka bulshada:
boeingaccessstation@soundtransit.org



Interpreter 800-823-9230

Español 漢語 한국어 日本語
Tagalog русский язык Tiếng Việt

Follow us:   

 **SOUNDTRANSIT**